
WITNESS STATEMENT OF ALI AREEF

I, Ali Areef, born on PD cousin of Halima Mohammed Shikh, of PD
Personal Data will say as follows:

1. I am the first cousin of one of the victims of the November 2021 tragedy, Halima Mohammed Shikh (“**Halima**”).
2. I make this statement in order to provide relevant information to the ongoing Cranston Inquiry, based on my knowledge and understanding of the circumstances leading up to and during the events under scrutiny. The matters set out in this statement are within my knowledge unless otherwise stated.
3. My knowledge extends up until the last time I saw Halima, which was in Paris on around 11 November 2021 and the aftermath of the incident on 23/24 November 2021. It has been nearly three years since these events took place and I am aware that this may have impacted my ability to recall all events and conversations fully or accurately.
4. My statement should be read together with the statement from my cousin, Abdullahi Mohamud Hassan (“**Abdullahi**”), which my legal representatives at Duncan Lewis solicitors have shown to me in draft form on 28 October 2024.
5. This statement was prepared with the assistance of my legal representatives at Duncan Lewis solicitors.
6. The documents referred to in this statement are exhibited to this statement.

Background

7. I am originally from Somalia. However, I left Somalia in around 2008 and am now a Norwegian national. I have been living in the UK for around four years, and have leave to remain under the EU Settlement Scheme. I am a part-time student in the UK. I also work part-time as an Uber and bus driver. I am married and I have three children.
8. Halima is my paternal cousin. I had not seen Halima since she was five years old until I met her in Paris in early November 2021.

9. I want to clarify that Halima's death certificate, issued by the French authorities on 17 December 2021, incorrectly states that she was born in 1998. Halima's brother Abdullahi has confirmed to me that she was born on 1 January 1988 in Somalia. She was 33 years old at the time of the tragedy on 23/24 November 2021.
10. I had known Halima and her family, including Abdullahi, when I was a child. We spent a lot of time together when we were growing up in Somalia. I met her again in Paris in 2021 because I happened to be in Paris to visit some friends of mine, including my brother-in-law. He told me that my cousin Halima was also in Paris. I had no idea before being told this that Halima was in Paris. I took Halima's number from my brother-in-law and arranged for us to meet each other.
11. I was in Paris for around a week between 4-11 November 2021. I saw Halima several times when I was there. The first time I saw her it was only me, my brother-in-law, and another friend. In addition to my brother-in-law, Halima and I had several mutual connections among the Somali community in Paris, and during the remainder of my trip we spent some time together with other friends, usually as part of a small group.
12. During those days that we spent together, we were mostly reminiscing with each other about our childhoods and catching up about our families. I am not sure exactly where she was living in Somalia before she left. Halima told me that she was divorced from her husband. Before she left Somalia, I do not think she had been working as I think she was looking after her children.
13. Halima had three children, who are now 13, 11 and 9. They are currently all still living in Somalia. Since Halima's death, Abdullahi has explained that they spend most of their time living with Halima's mother Madina Xuseen Xasan ("**Madina**"), outside of Mogadishu but they also spend time with their father, who lives in Mogadishu.
14. Halima was around 1.60m tall. I was not aware of her having had any pre-existing physical medical conditions or diagnosed mental health conditions. However, I remember that when we were together in Paris, I felt worried about her. She seemed very low and worried all of the time. We did not spend very much time alone just the two of us in Paris because we were usually with friends, so I never asked her directly what was wrong or if there was any way in which I could help her. I had the impression that she was keeping many worries to herself rather than sharing them with the people around her.

Journey from Somalia to France

15. I do not know when Halima left Somalia to travel to Europe, as we were not in contact then. I also do not know about Halima's journey from Somalia to Paris, or how she paid

for it. When we met, she briefly explained that she had flown from Somalia to Turkey using her passport and then travelled to Greece. I know now that while she was in Greece she had her fingerprints taken, and that later she was issued with some kind of travel document as a refugee. I did not know this when I met Halima in Paris. A friend of Halima's has since sent me a copy of this travel document, which says that it was issued on 19 April 2021 [AA1/EX1; INQ009437].

16. As I have explained, when I met Halima in Paris we saw each other in a group with my other friends. I was staying in a hotel in Paris. I have some photographs of us together taken on 4 November 2021[AA1/EX2; INQ009438]. It is difficult for me to remember exactly how many times we saw each other but I think it was around three different times between 4 - 11 November 2021. I had her Facebook and her WhatsApp from my brother-in-law so we would send each other messages to meet up. I no longer have these messages or her contact details. I do not know where she was staying or what her life was really like when she was not spending time with us in a group. She did seem very stressed and absent-minded but I do not really know what she was going through.
17. She explained to me at the time that she was waiting to hear back about her immigration case, as she had claimed asylum in France. She said that she did not really understand what was happening with it and she was not receiving any financial or legal support. I tried to reassure her at the time that she just needed to wait and that she would get an answer on her case. I had claimed asylum in Norway many years earlier so I knew from experience that it is important to stay calm and wait for a response.
18. We did not discuss the reasons why she had left Somalia in detail. There are clear reasons why people leave Somalia, as it is a very dangerous place. I think Halima was hoping she could find a better life for her and her children. We did discuss her divorce. Her marriage had been arranged for her and her ex-husband was much older than she was. She was glad to have left him and wanted to bring her children to Europe to live a different life.
19. When I saw Halima, she did not mention that she had any plans to try to get to the UK. I had no any idea that she was going to go to Northern France and try to cross the Channel by small boat. When I shared the news about the incident with her family in Somalia, they told me that they also had no idea that she was planning to cross to the UK. We do not even know how she was planning to afford such a trip, or who her contacts were to arrange the crossing.

Aftermath of the events of 23/24 November 2021

20. It is very hard for to me to understand what was happening during this time, as I knew very little about Halima's situation. I had been with Halima in Paris only around 10 days

before the incident and she had not mentioned anything about the UK. If I had known she was even thinking about it, I would have pleaded with her not to do it.

21. I first heard that Halima *might* have lost of her life around two or three days after the incident because a friend of Halima's, named [Name] (I do not know her surname), who I had met in Paris just over a week before, contacted me. We had exchanged our Snapchat details in Paris, which is how she got in touch with me. [N] explained that she had been contacted by another woman who said that Halima had been on the boat on the 23/24 November 2021. Halima had told this other Somali woman that she was planning to cross the Channel. I do not know this woman or her name. However, I do know that Halima had asked the woman to inform her friends (including [N]) and her family if anything went wrong during the crossing. This was how the information reached the Somali community in France, and how it was then passed on to me.
22. I had already seen in the UK news that many people had lost their lives in the Channel on 24 November 2021 and then I was told by [N] that it was possible this was the boat Halima was on. I remember that I was completely shocked by this phone call. The entire thing seemed unbelievable. I had just seen Halima about 10 days before, having not seen for since she was five years old, and suddenly I was told that she might have died.
23. The woman who had informed some of mine and Halima's friends about the incident also explained that there was a Somali survivor from the incident who was in the hospital. I was given his number, but was told that he was in critical condition and that it might be difficult for him to speak to me.
24. I called him a few days later. Mr Issa Mohammed spoke to me on the phone and he explained to me what had happened. I asked him if he could confirm whether Halima had been on that boat and if she had died. I sent a photo to Mr Mohammed of Halima and I in Paris the week before, and he confirmed that she had died. He told me that he was with Halima until she died and that he had heard her last words before she died. He heard her shouting '*help me, I don't want to die*' after the boat capsized and she was in the water. I now know that Halima was not able to swim.
25. I knew that I had to share this information about Halima's death with Halima's mother Madina, and the rest of her family in Somalia. I have spoken with Madina and Abdullahi on the phone quite often over the past few years and also with Halima's father before he died. I know that Madina was completely broken by the loss of her daughter, and that she continues to suffer every day.

26. I asked a few friends of mine and Halima's, who were living in France, to identify her body. They went to the morgue and they took a photo of Halima's dead body.¹ They sent this to me and to Abdullahi so that we could see if it was her. This is the last photo that we have of her. With the help of my friends in France, we contacted a leading figure within the Somali community to ask him if he could collect the death certificate and arrange for Halima's burial. I collected money from the Somali community I am a part of in London to make sure that the burial was done properly in France. We could not send the body to Somalia as it was too expensive. I then contacted the Somali Embassy in France who explained that they would cover the costs of the funeral in France. I transferred the money that I had collected for the funeral to Halima's mother. I was not able to attend the funeral in France as it was during the pandemic. I have not been back to France since Halima's death but as far as I am aware she is buried in Lille.

Impact

27. Looking back now, there are many questions that I did not ask Halima about her life when we met in Paris which I now wish I had. It had been a long time since we had seen each other and we were getting to know each other again. It was clear to me that she was struggling a lot and I did not feel like it would be appropriate to ask her private questions about her life or immigration status.

28. I was so shocked and confused when I found out she had died. I could not really understand it at first. I still fixate on this cruel coincidence: she had just come back into my life and we had reconnected, and then suddenly she was gone.

29. It is painful to think about her three children losing their mother in such a tragic way. I do not know how much they really understand about what happened. When I spoke with Madina, she told me that Halima's youngest child still thinks that she might come back one day, and that he will see his mother again.

30. Abdullahi has told me that he and the rest of the family in Somalia are grieving every day. His mother still cries every time that Halima is mentioned. It has been extremely hard for her and she is now the main carer for Halima's children. Halima was a good person with a good character; she was loved by those around her and kind to everyone. Fate has taken her away; we must learn to accept it but it is very hard.

¹ I am in possession of this photograph but it is not being formally exhibited at this time.

Conclusion

31. I hope that through this Inquiry, we will begin to understand how Halima lost her life that night, and that the people who failed her will take responsibility. I want to understand why Halima and all the other people on that boat were not rescued even though we have been told that the authorities made contact with the boat.

32. I will never take a ferry across the Channel again, or go to Paris. This tragic incident is never far away from my mind and it makes me feel sick to think about crossing the Channel in a ferry, where others, including a member of my family, lost their lives because there was no other way to cross.

Statement of Truth

I believe the facts stated in this witness statement are true. I understand that proceedings for contempt of court may be brought against anyone who makes, or causes to be made, false statement in a document verified by a statement of truth without an honest belief in its truth.

Signed:

Date:

Name:



BAYAANKA MARKHAATIGA EE ALI AREEF

Aniga oo ah Ali Areef, dhashay [PD] ilma adeerna la ah Halima Mohammed Sheikh, kuna nool [Personal Data] waxaan oranayaa sida soo socota:

1. Waxaan ahay ina adeerka kowaad ee mid kamid ah dhibanayaasha masiibadii dhacday Noofeembar 2021, Halima Mohammed Sheikh (“**Halima**”).
2. Waxaan u sameynayaa bayaankan si aan xog muhiim ah uga bixiyo baaritaanka Cranston ee socda, taas oo ku saleysan aqoontayda iyo fahamkayga ku saabsan duruufaha horseeday iyo kuwa lagu baarayo dhacdooyinkii dhacay. Arrimaha ku xusan bayaankan waa kuwa ku saleysan aqoontayda ilaa si kale loo sheego.
3. Xogtayda waxay gaarsiisan tahay ilaa markii ugu dambaysay ee aan arkay Halima, waxaan kuarkay Paris qiyaastii 11-kii Noofeembar 2021 iyo dhacdooyinkii ka dambeeyay masiibadi 23/24 Noofeembar 2021. Waxaa kasoo wareegatay ku dhowaad saddex sano tan iyo markii ay dhacdooyinkani dhaceen, waxaana ogahay inay tani saameyn karto awooddayda in aan si buuxda ama si sax ah u soo xasuusto dhammaan dhacdooyinka iyo wadahalada.
4. Bayaankeyga waa in lala akhriyaa bayaanka ka yimid ilma adeerkay Abdullahi Mohamud Hassan (“**Abdullahi**”), kaas oo wakiiladayda sharciga ee Duncan Lewis solicitors ay igu tuseen si qoraal ah 28-kii Oktoobar 2024.
5. Bayaankan waxaa la diyaariyay iyadoo laga kaashanayo wakiiladayda sharciga ee Duncan Lewis solicitors.
6. Dukumentiyada lagu xusay bayaankan waa kuwa la socda bayaankan.

Asalka

7. Asal ahaan waxaan ka soo jeedaa Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ka tagay Soomaaliya qiyaastii 2008, waxaana hadda ahay muwaadin Norwejiyaan ah. Waxaan ku noolahay UK muddo ku dhow afar sano, waxaanan haystaa oggolaanshaha joogitaanka ee Nidaamka Deganaanshaha Midowga Yurub. Waxaan ahay arday galin wax kabarta



HABIBI
Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY

Email: info@habibi-interpreting.co.uk

Contact: PD 181 PD 366 PD 933

gudaha UK, sidoo kale waxaan galinna ka shaqeyaa darawal Uber iyo baska. Waxaan qabaa xaas waxaana ii jooga saddex carruur ah.

8. Halima waa ina adeertay. Ma aanan arag Halima tan iyo markii ay ahayd shan jir ilaa aan kula kulmay Paris bilowgii Noofeembar 2021.
9. Waxaan rabaa inaan caddeeyo in shahaadada geerida Halima oo ay soo saareen mas'uuliyiinta Faransiiska 17kii Diseembar 2021 ay khaldan tahay oo ay ku qoran tahay inay dhalatay 1998. Abdullahi oo ah Halima walaalkood, ayaa ii xaqiijiyay in Halima ay ku dhalatay Soomaaliya 1 Janaayo 1988. Waxay jirtay 33 sano xilligii musiibadu dhacday 23/24 Nofeembar 2021.
10. Waxaan aqaanay Halima iyo qoyskeeda, oo uu ku jiro Abdullahi, markii aan yaraa. Waxaan waqti badan isla qaadan jirnay intii aan ku koraynay Soomaaliya. Waxaan mar kale ku kulannay Paris 2021 sababtoo ah waxaan u tagay Paris si aan u soo booqdo qaar kamid ah asxabtayda, oo uu ku jiro seedigay. Wuxuu ii sheegay in ina adeertay Halima ay iyaduna ku sugnayd Paris. Ma aanan ogeyn ka hor inta uusan ii sheegin in Halima ay ku sugnayd Paris. Waxaan seedigay ka qaatay lambarka Halima waxaana aniga iyo Halima qorsheynay inaan kulanno.
11. Waxaan joogay Paris qiyaastii isbuuc inta u dhaxaysa 4-11 Nofeembar 2021. Waxaan Halima arkay dhowr jeer intii aan halkaas joogay. Markii ugu horreysay ee aan arkay, waxaan kaliya ahayn aniga, seedigay, iyo saaxiib kale. Marka laga soo tago seedigay, aniga iyo Halima waxaan ku wada lahayn asxaab bulshada Soomaaliyeed ee Paris, inta ka hartayna safarkayga waxaan waqti wada qaadan jirnay asxaab kale, badanaa annagoo ah koox yar.
12. Maalmahaas aan wada qaadanay, waxaan inta badan ka sheekaysanaynay xusuustii caruurnimadayada iyo xaaladda qoysaskeena. Si dhab ah uma hubo meesha ay uga noolayd Soomaaliya ka hor intaanay soo tagin. Halima waxay ii sheegtay inay kala tageen ninkeedii. Ka hor intaanay kasoo tagin Soomaaliya, uma malaynayo inay shaqaynaysay maadaama aan u malaynayo inay carruurteeda daryeelaysey.
13. Halima waxay lahayd saddex carruur ah, oo hadda jira 13, 11 iyo 9 sano. Dhamaantood wali waxay ku nool yihiin Soomaaliya. Tan iyo markii ay Halima geeriyootay, Abdullahi ayaa ii sharaxay inay inta badan la nool yihiin Halima hooyadeed, Madina Xuseen Xasan ("Madina"), oo ku nool meel Muqdisho ka baxsan, laakiin waxay sidoo kale waqti la qaataan aabahood oo ku nool Muqdisho.



HABIBI
Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
 35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
 Email: info@habibi-interpreting.co.uk
 Contact: PD 181 PD 366 PD 1933

14. Halima qiyaastii dhererkeedu wuxuu ahaa 1.60 mitir. Ma aanan ku ogeyn xaalado caafimaad oo jireed ama xaalado la xiriira caafimaadka dhimirka oo hore loogu sheegay. Si kastaba ha ahaatee, waxaan xasuustaa markii aan Paris isla joognay in aan ka walwalsanaa iyada. Waxay u muuqatay inay mar walba aad u murugsanayd oo walbahaar ku jirto. Labadeena oo kaliya maanaan wada qaadan waqti badan intii aan ku sugneyn Paris sababtoo ah inta badan waxaan la joogney saaxiibbo, sidaas darteed si toos ah umaanan weydiin waxa khaldan ama haddii ay jirto wax aan ku caawin karo. Waxaan dareemay inay wax badan qarsanaysay oo aysan la wadaageyn dadka ku hareereysan.

Safarka laga bilaabo Soomaaliya ilaa Faransiiska

15. Ma aqaan goorta ay Halima kasoo baxday Soomaaliya si ay ugu safarto Yurub, maadaama aanan xiriir lahayn wakhtigaas. Sidoo kale ma aqaan wax ku saabsan safarka Halima ee ka bilaabmay Soomaaliya ilaa Paris, ama sida ay ku bixisay qarashka safarkeeda. Markii aan kulannay, waxay si kooban iigu sheegtay inay diyaarad kasoo raacday Soomaaliya ilaa Turkiga iyadoo isticmaalaysa baasaboorka, ka dibna ay u safartay Giriigga. Hadda waxaan ogahay in fara looga qaaday markii ay ku sugnayd Giriigga, iyo in markii dambe la siiyay nooc ka mid ah dukumeentiga socdaal ee qaxootiga. Ma aanan ogeyn arrintan markii aan Halima kula kulmay Paris. Halima saaxiibadeed ayaa ii soo dirtay nuqulka dukumentigan socdaalka, kaasoo sheegaya in la soo saaray 19kii Abriil 2021 [AA1/EX1; INQ009437].

16. Sidaan horay u sharaxay, markii aan Halima ku kulannay Paris waxaan is aragnay annagoo koox ah oo ayna wehliyaan asxaabteyda kale. Waxaan deggenaa hotel ku yaalla Paris. Waxaan hayaa sawirro aan wada galnay oo la qaaday 4tii Nofeembar 2021 [AA1/EX2; INQ009438]. Way igu adag tahay inaan si sax ah u xasuusto inta jeer ee aan is aragnay laakiin waxaan u maleynayaa inay ahayd saddex jeer oo kala duwan inta u dhaxaysa 4 - 11 Nofeembar 2021. Waxaan ka helay Facebook-keeda iyo WhatsApp-keeda seedigay, sidaas darteed waxaan isu diri jiray fariimo si aan u kulanno. Ma hayo hadda fariimahaas ama faahfaahinta meelihi aan kala xiriiri jiray. Ma aqaan meesha ay degganayd ama nolosheeda sida ay ahayd markii aysan nala joogin koox ahaan. Waxay u muuqatay mid aad u walwalsan oo fikir badan leh laakiin si dhab ah uma aqaan waxa la soo darisay.

17. Waxay ii sharaxday xilligaas inay ka sugaysay jawaab kiiskeeda socdaalka, maadaama ay magangalyo ka codsatay Faransiiska. Waxay iisheegtay in aysan fahmin waxa ku dhacay dacwadeeda mana aysan helin taageero dhaqaale ama mid sharci ah. Waxaan isku dayay inaan wakhtigaas niyada udhiso oo aan u sheego inay u baahan tahay inay sugto jawaabta dacwadeeda. Waxaan magangalyo ka codsaday Norway dhowr sano ka hor sidaas darteed waxaan ogahay muhiimadda ay leedahay inaad degganaato oo aad sugto jawaabta.



18. Ma aanan kawada hadal sababaha ay uga soo tagtay Soomaaliya. Waxaa jira sababo cad oo dadku uga soo tagaan Soomaaliya, waayo waa meel aad u khatar badan. Waxaan u maleynayaa in Halima ay rajeyneysay inay hesho nolol ka wanaagsan midda ay iyada iyo carruurteedu ku sugnaayeen. Waxaan ka hadalnay furitaankeeda. Guurkeeda wuxuu ahaa mid laqabanqaabiyay iyadoo ninkeedaas hore uu aad uga weynaa iyada. Waxay ku faraxsanayd inay isaga katagtay waxayna kuhaminaysay inay carruurteeda keento Yurub si ay u helaan nolol fiican.
19. Markii aan arkey Halima, ma aysan sheegin wax qorshe ah oo ku saabsan inay isku dayeyso inay timaado UK. Anigu ma aanan ogeyn inay u socotay Waqooyiga Faransiiska oo ay qorsheysay inay ka gudubto Kanaalka iyada oo isticmaalaysa doon yar. Markii aan la wadaagay qoyskeeda Soomaaliya wararka ku saabsan dhacdada, waxay ii sheegeen inay iyaguna wax war ah u haynin oo aysan ogeyn inay qorsheyneysay inay u gudubto UK. Xitaa ma naqaan sida ay u qorsheysay inay ku maareyso qarashaadka safarka noocaas ah, ama cidda ay xiriirka la sameysatay si ay u si ay u qorshayso safarka.

Kadib Dhacdadii 23/24 Nofeembar 2021

20. Aad ayey iigu adag tahay inaan fahmo waxa dhacayay xilligaas, sababtoo ah wax yar ayaan ka oгаа xaaladda Halima. Waxaan la joogay Halima Paris qiyaastii 10 maalmood ka hor dhacdada, mana aysan sheegin wax ku saabsan UK. Haddii aan ogaan lahaa inay xitaa ku fikirayso arrintaas, waxaan ka codsan lahaa inay ka joogto.
21. Markii ugu horreysay ee aan maqlay in Halima laga yaabo inay geeriyootay waxay ahayd qiyaastii labo ama saddex maalmood kadib dhacdada, sababtoo ah Halima saaxiibadeed, oo la yiraahdo [Name] (magaceeda dambe ma aqaan), oo aan kula kulmay Paris toddobaad ka hor, ayaa ila soo xiriirtay. Waxaan kala qaadanay Snapchat intii aan joogay Paris, xagaas ayayna igala soo xiriirtay. [Name] waxay ii sheegtay in haweeney kale oo Soomaali ah ay laso hadashay oo ay u sheegtay in Halima ay doonta saarnayd 23/24-kii Nofeembar 2021. Halima waxay u sheegtay gabadhaas Soomaalida ah inay damacsan tahay inay ka gudubto kanaalka. Aqoon umalihi gabadhaas mana aqaan magaceeda. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ogahay in Halima ay kacodsatay gabadhaas inay wargeliso saaxiibbadeeda (oo [N] ku jirto) iyo qoyskeeda haddii wax qaldamaan inta ay safarka ku jirto. Sidan ayay xogtu ku gaartay bulshada Soomaaliyeed ee ku sugan Faransiiska, anigana sidaas ayaa xogtu igu soo gaartay.
22. Hore ayaan ugu arkay wararka UK inay dad badan ku dhinteen kanaalka 24-kii Nofeembar 2021, markaas kadibna [N] ayaa ii sheegtay inay suurtoagal tahay in doontu tahay tii Halima ay saarneed. Waxaan xasuustaa in warkan aan aad uga naxay. Arrintu waxay ila noqotay wax aan la rumeysan karin. Waxaan Halima arkay qiyaastii 10



maalmood ka hor, iyadoo aanan arkin tan iyo markii ay 5 sano jir ahayd, waxaana si lama filaan ah la iigu sheegay inay dhimatay.

23. Haweeneyda usoo sheegtay xogta ku saabsan dhacdada qaar ka mid ah asxaabteyda iyo saaxiibbada Halima ayaa sidoo kale sharaxday inuu jiro qof Soomaali ah oo ka badbaaday dhacdada, kaasoo isbitaal ku jiray. Waxaa la isiiyay lambarkiisa, laakiin waxaa la ii sheegay inuu xaalad halis ah ku jiro oo laga yaabo inay adag tahay inuu ila hadlo.
24. Waxaan wacay dhowr maalmood kadib. Issa Mohammed ayaa igala hadlay telefoonka wuxuuna ii sharaxay wixii dhacay. Waxaan weydiyay haddii uu xaqiijin karo in Halima doonta ay saarnayd iyo inay dhimatay. Waxaan u diray Issa Mohammed sawir aan kuwadagalnay Halima iyo aniga Paris toddobaad ka hor, wuxuuna xaqiijiyey inay dhimatay. Wuxuu ii sheegay inuu la joogay Halima ilaa ay dhimatay, oo uu maqlay erayadeedii ugu dambeeyay ka hor inta aysan dhiman. Wuxuu maqlay iyadoo la qaylinaysa "*i caawiya, ma doonayo inaan dhinto*" kadib markii doontu rogmatay iyadoo biyaha ku jirta. Hadda waxaan ogahay in Halima aysan awoodin inay dabaalato.
25. Waxaan ogaa in laiga baahnaa in qoyska Halima, gaar ahaan hooyadeed Madina, iyo qoyska kale ee Soomaaliya aan la wadaago xogtan ku saabsan geerideeda. Waxaan si joogto ah telefoonka ugala hadlaayay Madina iyo Abdullahi sanadihii la soo dhaafay, sidoo kale aabbaha Halima intii uu noolaa. Waan ogahay in Madina ay si xun uga naxday geerida gabadheeda, oo ay weli la tacaalayso maalin walba.
26. Waxaan ka codsaday qaar kamidah saaxiibadey iyo saaxiibbada Halima, oo ku noolaa Faransiiska, inay so aqoonsadaan meydkeeda. Waxay aadeen goobta meydadka waxayna kasoo qaadeen sawir.¹ Waxay noo soo direen aniga iyo Abdullaahi si aan u hubino inay iyada tahay. Tani waa sawirkii ugu dambeeyay ee aan ka hayno iyada. Anigoo kaashanaya saaxiibbadeyda Faransiiska jooga, waxaan la xiriiray qofka uhadla bulshada Soomaaliyeed si aan uga codsanno inuu soo qaado shahaadada dhimashada iyo inuu diyaariyo aaska Halima. Waxaan lacag ka soo aruuriyay bulshada Soomaaliyeed ee aan ka tirsanahay ee London si aan u hubiyo in aaska si wanaagsan loogu sameeyo Faransiiska. Ma awoodin in meydka Soomaaliya loo qaado sababtoo ah aad bay qaali uahaan lahayd. Kadib waxaan la xiriiray safaaradda Soomaaliya ee Faransiiska waxayna ii sheegeen inay bixin doonaan kharashka aaska. Waxaan lacagtii aan usoo ururiyay aaska ku wareejiyay Halima hooyadeed. Ma aanan awoodin inaan ka qayb galo aaska sababtoo ah waxay ahayd xilligii faafitaanka cudurka. Tan iyo markii ay Halima dhimatay ma aanan ku noqon Faransiiska, laakiin inta aan ogahay waxay ku duugantahay Lille.

Saameynta

¹ Waan hayaa sawirkan, laakin xilligan si rasmi ah looma soo bandhigin.



27. Hadda oo aan dib u milicsado, waxaa jira su'aalo badan oo aanan weydiinin Halima markaan ku kulannay Paris oo aan jeclaan lahaa inaan weydiiyo. Waqti dheer ayaanan is arkin, waxaan isku dayaynay inaan mar kale is baranno. Waxaa ii caddayd in ay dhibaatooyin badan la tacaalaysay, mana aanan u arkin inay ku habboon tahay inaan weydiiyo su'aalo gaar ah oo ku saabsan nolosheeda ama xaaladdeeda socdaalka.
28. Aad ayaan u naxay oo u wareeray markii aan ogaaday inay dhimatay. Ma aanan qaadan karin markiiba. Weli waxaan ka fikirayaa dhacdadaan naxdinta leh: Waxay mar kale kusoo noqotay noloshayda oo dib ayaan isku helnay, kadibna si lama filaan ah ayay nooga tagtay.
29. Waxaa murugo badan in carruurteeda saddexda ah ay hooyadood sidaan naxdinta leh kuwaayeen. Ma aqaan inta ay dhab ahaantii ka fahansanyihiin wixii dhacay. Markii aan la hadlay Madina, waxay ii sheegtay in carruurta Halima midka ugu yar uu weli rajaynaayo in hooyadiis ay maalin uun soo laaban doonto, oo uu mar kale arki doono.
30. Abdullahi ayaa ii sheegay inuu isaga iyo qoyska intiisa kale ee Soomaaliya kunool ay maalin walba murugoonayaan. Hooyadiis weli way oynaysaa mar kasta oo Halima lasoo hadal qaado. Waxay ahayd arrin aad ugu adag, iyadaana haatan daryeesha carruurta Halima. Halima waxay ahayd qof wanaagsan oo akhlaaq wanaagsan leh; qof walba oo hareeraheeda joogay wuu jeclaa, naxariisna way lahayd. Wax qoran ayay ahayd; waana inaan aqbalna, laakiin way adag tahay.

Gunaanadka

31. Waxaan rajeynayaa in baaritaankan uu na fahamsiin doono sida Halima nolosheeda u weyday habeenkaas, iyo in dadka ku guuldareystay inay caawiyaan ay mas'uuliyadeeda qaadan doonan. Waxaan rabaa inaan fahmo sababta Halima iyo dadka kale ee doonta saarnaa aan loo badbaadin xitaa inagoo naloo sheegay in mas'uuliyiinta ay la xiriireen doontaas.
32. Mar dambe ma raaci doono doon ka tallaabta kanaalka, mana aadayo Paris. Dhacdadani ma aysan kabixin maskaxdayda wali, waana dhibsadaa in aan ku fikiro inaan kanaalka mar labaad ka tallaabo, iyadoo ay jiraan dad kale, oo ay ku jirto qof kamidah qoyskayga, kuwaasoo noloshooda ku waayay sababtoo ah jid kale ma aysan haysan.

Bayaanka Runnimada



HABIBI
Interpreting and Translation
Breaking the language Barrier

Habibi Interpreting and Translation LTD
35 Pinner Park Avenue, Harrow, London, HA2 6JY
Email: info@habibi-interpreting.co.uk
Contact: PD¹⁸¹ PD³⁶⁶ PD⁹³³

Waxaan rumeysanahay in xaqiiqooyinka lagu sheegay bayaankan markhaatiga ay yihiin kuwo run ah. Waxaan fahamsanahay in dacwad lagu soo oogi karo qof kasta oo sameeya, ama sababa in la sameeyo, bayaanno been abuur ah oo ku jira dukumeenti lagu xaqiijiyey bayaanka runnimada isagoo aan haysan rumeyn daacad ah oo ku saabsan runnimadaas

Saxiix:

Personal Data

Taariikh: 7/11/2024 | 14:59:32 GMT

Magaca: Ali Areef

I have translated the above text from English into Somali language to the best of my knowledge, ability, and command of both these languages. Translator: Personal Data Date: 04/11/2024